

## Koorsooyinka ESOL Setembar 2007da – WARBIXIN MUHIIM AH

Haddii aad rabto in aad gasho koorso ESOL waa in aad booqato ama wacdo xarunta ama kulliyadda kuugu dhow si aad u ogaato sida aad u codsan karto.

Koorsooyinka ESOL aad ayaa loo jecel yahay waxaa markaa khasab noqon karta in aad gasho liis sugitaan.

### Waa maxay qiimahoodu?

**Fasallada ESOL waa bilaash haddii adiga (ama xaaskaaga ama ninkaaga) aad qaadataan mid kastoo ka mid ah kaalmooyinka soo socda:**

Gunnada Shaqo raadsadaha (Jobseekers Allowance) (JSA)

Kaalmada Canshuurta Dawladda hoose (Council Tax Benefit)

Kaalmada Ijaarka (Housing Benefit)

Taageerada Dakhliga (Income Support)

Gunnada togan ee Canshuurta Shaqada (Working Tax Credit) (kasbadana in ka yar £15,050)

Gunnooyinka togan ee Hawlgabka (Pension Credits) (Gunnada togan ee Ballanqaadka (Guarantee Credit) oo keliya)

**Ama haddii aad tahay ku tiirsanaha aan mushaar qaadan ee mid kastoo ka mid kuwa kore**

**Ama haddii aad tahay Dembiile Bulshada lagu ilaalinayo (Community Offender)**

**Ama haddii aad tahay 16 – 18 jir**

Waxaad u baahan doontaa in aad keento waraaqahaaga si aad u muujiso kaalmooyinka aad qaadata.

**Haddii aad shaqayso, kulliyadda kuugu dhow ayaa kuu sheegi karta qiimaha fasallada**

Haddii aadan qaadan kaalmooyin oo aadan shaqayn, **ama**

haddii aad kasbato in ka yar £15,050 sanadkii, waxaa laga yaabaa in kulliyadda xaafaddaadu ay kaa caawiso ujrrooyinka.

Fadlan keen wixii waraaqo ah ee aad taas ku muujin karto:

sida Waraaqaha mushaarka, waraaqaha canshuurta ee P60, foomam kaloo canshuur

**Haddii aad rabto in aad kaalmooyin codsato:**

- Tag Xafiiska Xarunta shaqo-bixinta Gaarka ah (Jobcentre Plus Office) ee xaafaddaada

Si aad u codsato Lambarka Caymiska Qaran (National Insurance Number) wac 0845 600 0643 ama tag Xafiiska Xarunta shaqobixinta Gaarka ah ee xaafaddaada.

## WARBIXIN MUHIIM AH – u qalmista koorsooyinka Kulliyadda

La xiriir kulliyadda si aad faahfaahin dheeraad ah u hesho

Qaar ka mid ah koorsooyinkayagu waa 'Kharashka Buuxa' taasoo ka dhigan in aad bixinayso kharashyadoo dhan.

Koorsooyinkayaga intooda kale waxaa kabaya Guddiga Waxbarashada iyo Xirfadaha (Learning and Skills Council) (LSC) – waxaad u baahan kartaa in aad urooyinka qaarkood bixiso ama koorsadu bilaash ayay noqon kartaa. Waa in aad la xiriirto kulliyadda xaafaddaada si aad taas u ogaato. Waxaa laga yaabaa in ay jiraan bog internet ama khad telefoon oo is-qoris, ama waxaad u baahan doontaa in aad taas booqato.

Jadwalka hoose ayaa muujinaya qaar ka mid ah kooxaha dadka ee u qalmi kara koorsooyinka uu maalqeliyo guddiga LSC.

Kuwani kuma habboona xaaladwalba. Kulliyadda xaafaddaada ayaa kaala talin karta wixii ku xiran xaaladdaada.

U qalmista koorsooyinka uu LSC maalqeliyo:	Tusaalooyinka Caddaynta
Muwaadiniinta Ingiriiska	Baasaboorrada Ingiriiska ama Waqooyiga Ireland Shahaadada Qaadashada dhalashada (Certificate of Naturalisation) Diiwaangelinta Waddaninimada Ingiriiska (Registration as a British Citizen)
Deggan Ingiriiska 3 sano (ama xaaska ama ninka ama lammaanaha sharci ee soo degganaa Ingiriiska 1 sano)	Baasaboorrada loo shaabbadeeyey si ay ugu muujiyaan in ay Ingiriiska ku leeyihiin Xaq Degganaanshaha (Right of Abode) ama Oggolaanshaha Joogtada ah ee gelitaanka ama degganaanshaha (Indefinite Leave to enter or remain) Warqadda Wasaaradda Gudaha (Home Office)
Dawladda Ingiriiska ka haysta sharciga qaxootinimada (ama xaaska ama ninka ama lammaanaha sharci ama ilmaha) Fiiri Qoraalka 1 aad	Dukumeentiga Wasaaradda Gudaha
Muwaadinka Midowga Yurub (EU) ama haajiraha shaqaalaha ah ee Aagga Dhaqaalaha ee Yurub (EEA) ee soo degganaa EEA 3 sano (ama xaaska ama ninka ama lammaanaha sharci ama ilmaha) Fiiri Qoraalka 2aad	Baasaboorka Midowga Yurub (EU)

### Qoraallada

1. axaan kan ku jira qof kastoo loo diiday sharciga qaxootinimada laakiin uu Wasiirka Dawladdu (Secretary of State) u oggolaaday in ay joogaan, la siiyey Badbaadinta Jirxista ah (Humanitarian Protection) ama Oggolaanshaha Qarsoodiga ah (Discretionary Leave), ama ay Dawladda Ingiriisku siisay oggolaanshaha gaarka ah ee gelitanaka ama degganaanshaha (exceptional leave to enter or remain), si caadi ahna u soo degganaa Ingiriiska ama Jasiiradaha tan iyo markii la aqoonsaday, (ama xaaska ama ninka ama lammaanaha sharci ama ilmaha qofka sidaasoo kale ah).

Dadka Magangalyo Doonka ah (Asylum Seekers) ee 6 bilood ka dib weli sugaya in codsigooda laga fiirsado, waxay u qalmi doonaan koorsooyinka uu LSC maalqeliyo.

2. Aagga Dhaqaalaha ee Yurub (EEA) ee halkan, waxuu khuseeyaa Midowga Yurub (EU), Iceland, Liechtenstein, Switzerland iyo Norway.